CENTER FOR INCLUSIVE CHILD CARE

Talooyin kooban

Arimaha saamaynta kuleh Dabeecadda

Inta macallinku uu fiiro deeraad ah uu cunuga ku baranayo uu uyeesho, arimaha cunuga dabeecadiisa saamaynta kuleh ayuu ogaan karaa. Arimo badan ayaa saamayn kuyeelan kara cunuga dabeecadihiisa ama waxa ay ugu adagtahay cunugu in uu wax laqabsado. Qaar ka mid ah arimahaan waa kuwa laxiriira cunuga bay'adda uu kunoolyahay ama guriga ama xarunta caruurta lagu xanaaneeyo. Qaar ka mid ah arimaahaan waa arimo gudaha ah oo saldhig ku leh neerfayaasha. Arimaha qaarkood waa la xakamayn karaa, ayadoo loo yaraynayo cunugga xiisadaha. Qaari ka mid way adagtahay sida lagu xakameeyo amase maba laxakamayn karo. Cunuga waxaa laga yaabaa in uu u baahdo in labaro oo loogu ceelceliyo sida ay olaqabsan lahaayeen arimaha aysan awood u lahayn in ay xakameeyaan.

Arimaha Laxiriira Bay'adda oo Saamay weeyn ku yeelan kara cunuga dabeecadiisa iyo dhaqankiisa.

- Bay'ad si xad dhaaf dareemaha cunuga u kicisa
- Rajooyinka laga qabo cunuga marka ay aad u sareeyaan ama aad u hoo seeyaan
- In uu marqaati kanoqdo ama ay asaga kudhacdo xadgudub (xadgudub kaasoo noqon kara xag jir, xag galmo ama xag dareen ahaan)
- Dayac
- Shaqooyin karaba cunuga wax yar ama wax badan
- Waxa cunuga laga filayo marka aysan joogto ahayn
- Qof ay jecelyihiin markuu ka geeriyoodo ama ay si kale ku waayaan
- Markuu reerka cunug ku soo siyaado
- Markuu muran ka dhaho waalid iyo qofka cunuga hayya ama uu muran ka dhaco labadiisa waalid
- Markii uusan fursad badan u helin in uu sheegan karo wuxuu doorto
- Daawooyinka la qaato
- Markii cunuga lagu dhiiragaliyo ama lagu maamuuso gardarrada
- Medication
- Marka ay kadaawadaan tv-ga dagaalada
- Markii uu isbedbeddel badan oo kayimaado caadada haysmada ama qofka hayya cunuga
- Markii baahidooda iyo dareenkooda lakaafin waayo
- Faqriga ama markii uu cunugu lacag ka walwalo
- Markii uu qof ehel ah ama waalid uu maskaxda kajirado
- Qof ehel ah markii uu mukhaadaraadka ku xadgudbo

Arimaha Gudaha ah oo Saamayn Kuleh Cunuga Dabeecadiisa

- Shaqsiyadiisa
- Xanuun
- Daal
- Gaajo
- Nafaqo Darro
- Naafada jirka
- Cagabaddo xagga neerfayaasha
- Daahitaan xagga korinimada
- Hadalka iyo luuqadda oo adkaada

Bay'adda iyo Agagaarka uu Cunugu ku Korayo

- Bay'adda ama sida ay meeshu uu habaysantahay, ayaa saamayn weeyn waxay ku leedahay sida uu cunuga dabeecadiisa.
- Xitaa isbedello aan ladareemi Karin oo kusaabsan bey'adda ayaa saamayn kuyeelan kara cunugga dabeecadiisa. Tusaale fiican waxaa weeye markii lookeeno cunuga fadhi asaga le'eg xarunta caruurta lagu xanaaneeyo.
- Bay'addu waxaa lagu tilmaama inta ay ilmuhu maantii oo dhan ay kuciyaaraan, joogaan, kuna mushaaxaan, gudaha iyo banaankaba, iyo sida meelahaas ay u habaysan yihiin iyo sida meesha loo dar yeelo.
- Meelaha ay joogaan caruurta muuqaalkeeda ayaa la ogaan karaa markii fasalka lagu dhex socdo ama booska lasawiro. Tusaale ahaan, ciyaalku orod beey isdhigayaan hadii ay helaan meel dhuuban oo dheer oo banana. Sidoo kale hadii uu fasalku leeyahay boosas banana oo kala baxsan. Waa muhiim in qolka siduu uqaabaysanyahay laga beeraan dago ayadoo laga fiirinayo meeshuu cunugu wax ka arkayo ayadoo fasalka lagu dhexsocdo.
- In bay'adda wax laga bedello waxay sahli kartaa in ay yarayso ama baabi'iso dabeecad xun.

Bay'addoo wax laga bedelo

- Xooshka iyo waxa isdhexdaadsan ka takhaluus. Fududee qaabaynta qolka iyo alaabta taalla. Kudar waxyaalo ay qabtaan caruurta oo lakala doordooran karo. Sii caruurta waxyaalo ay qabtaan oo laka doordoran karo oo kuhaboon da'dooda. Tan waxa ay yarayn kartaa dabeecado sida warwareeg iyo cunugu in uu garan waayo wax uu qabto.
- Shay kasta meel u samee. Sawiro wax ku magacaw si aad u ogaatid wax kasta meesheey yaalaan. Tan waxay sahli kartaa dabeecado sida in alaabta oo si qaab daran loo isticmaalo iyo in ladiido in wax lanadiifiyo.
- Marfishyo agagaarada kuhabee si meel kasta ay uyeelato in u go'an caruurtu nah aysan waxa meel kale kasocda ugu mashquulin ama tooda kajeedin. Tani waxay sahalaysaa in ay yaraato dabeecada sida cunugu in hadba lajeediyo ama in ay dhib kunoqota in uu tiisa ku mashquulo.

Arimo kale oo la'ogyahay ama kuwa aan la'ogayn ba ayaa sabab u noqon kara dhibaato cunuga kudhacda. Markii arin lagarawsan karo, waxaa dhici karta in laga takhluuso ama wax laga bedelo, si uu cunuga cabashada iyo dhibka saamaysay ay ogayaraato. Tusaale ahaan, hadii uu cunug gaajoodo markii uu yimaado xarunta xanaanada, waxaa sii caawin lahaa in uu si dagan u ciyaaro waxna barto hadii uu quraac soo cuni lahaa ama cunto fudud. Mararka qaarkood xarumaha xanaanada in uu diido ayaa lagayabaa taladaas sababta oo ah waxaa laga yaabaa quraacda in ay isyiraahdaan waalidiinta caruurta dhalay ayaa ka mas'uul ah, ama ay isdhahaan waqti badan ayuu idinka cunayaa ama in ay isdhahaan qorshaha ayuu bedel ku keeneyaa. Hasa yeeshee, cunug kasta baahidiisa aasaasiga ah waan in lakaafiyaa inta aan hawl laga sugin shaqo iyo ciyaar uu ladhinac qaado caruurta kale si iskaashi leh. Macalimiintu waa in ay xanaanadoodu ay yeelato dabacsanaan iyo in ay diyaar u yihiin in layimadaan wax kasta oo uu cunuga ka caawin kara in uu sameeyo wax kasta sida ugu fiican oo karaankiisa ah.

Hadii aad u baahantahay faahfaahin dheeraad ah oo kusaabsan caruurta dabeecadahooda, waxaad booqataa: www.inclusivechildcare.org.

Copyright © 2019 Center for Inclusive Child Care

These materials may be freely reproduced for educational purposes. Information in this tip sheet has been modified from multiple sources. Funding provided by the Minnesota Department of Human Services.